



Bisha May 14 keeda 2019, dadka degan dugsiga degmada ee North St. Paul-Maplewood-Oakdale 622 waxay awood u leeyihiin inay codeeyaan si ay dhaqaale ugu ururiyaan horumarka dhamaan degmada.

Aragtidayadu waxa weeye inaan bixino/siino dhamaan ardayda Degmada 622 goob waxbarasho, nabadg alyadiisu sugantahay, isla markaana casri ah si ay uga caawiso inay naftooda dhisaan una diyaar garooban mustaqbalka beri.

WAA MAXAY SOO JEEDINTU?

Labadii sanee tagay, shaqaalaha degmadu iyo khubarada dhismihu waxay qiimaynayaan da'da, ku filnaanshaha, iyo inay goobaha wax lagu barankaro ee dugsigeena, iyadoo layskugu keenay fikradaha bulshada. Natijada talooyinku waa sida tan:

- In la cusboonaysiiyo dhamaan qaybaha degmada
- In lagu koobo saddexdii dugsi hoose lagana dhigo laba, kaasoo lagu xidhayo labadayada dugsi sare.
- In lagu xoojiyo sagaalka dugsi hoose toddoba kaliya kuwaasoo la balaadhiyo dib u habayna lagu sameeyo

Waxyaabaha ugu weyn uu ka kooban yahay:

- ✓ Ku dar gelitaano amaankoodu sugan yahay dhamaan dugsiyada (\$33M)
- ✓ Sii dhamaan dugsiyada qalabka dugsiga oo casriya iyo fasalo waasic ah una madax banana waxbarashada kooxaha yaryar, iyo kuwa waaweynba (\$14M)
- ✓ Dib u haynta iyo/ama balaandhinta shan dugsi (\$147M)
- ✓ Dhisida laba dugsi hoose oo cusub (\$77M)
- ✓ Xidhista ama dib u celinta dugsiyada qaar (\$4M)

MAXAA SABABAY HADDA?

- Inta ugu badan dhismayaasha dugsiyada yadu waxay ka weyn yihiin 50 sano iyo inaanay ahayn qaar loo qaabeeyey goob waxbarasho oo hadda la joogo.
- Dhismayaal badan ayaa leh xidhiidhi saxmad, cabashooyin amni iyo kuwo badbaadoba
- Macalimiintu waxay isticmaalayaan meelaha lagu guo dharka iyo meelo kale oonku banaanayn shaqooyinka kooxaha yaryar iyo xafiisyada shaqaalaha.
- Qalabka fasalada waxaa loo qaabeeyey hab casharo ku bixin, iyadoo ku yartahay meesha wax lagu baranayo haday tahay kooxo yaryar, kooxo waaweyn, mid-mid iyo wada shaqaynba
- Dhismayaal badan ayaa leh saqafka sare, meesha baarkinka gaadhiga, meesha lagu ciyaaro, habka kulaylka, iyo qalabkii loo baahnaa haddii wax lagu hagaajinayo.
- Goobaha dugsigeena iyo xuduudihisaba maaha kuwo la jaanqaadaya ardayda, sababaya buuxsanaan xad dhaaf ah iyo kala qaybsanaanta meelaha qaar.
- Maaha mid qaali ah in la dhiso dugsiyo cusub, la xoojiyo qaar kale, iyo in dib loo hagaajiyo dhamaan inta hadhay si ay u hagaagaan dhamaan dhismayaasha hada jira.
- Ku ilaalinta dhismayaasha inay casri noqdaan, bad baadsan ahna kuw caafimaad qaba, marmarka qaar waxay u baahan yihiin maalgelin wax ku ool ah, sida ugu badan hagaajinta guryaha.

WAA MAXAY KHARASHKU?

Haddii codeeya yaashu aqbalaan aftida, celceliska kororka cashuurta ee mulkiilaha guriga* waxay noqon doontaa \$5 bishiiba. Halka kharashka guud ee mashquucuu yahay \$275 milyan, degmadu waxay awoodaa inay samayso shaqada iyadoo leh ugu yaraan koror cashuur maadaamo la bixiyey deynti hadda.

*\$200,000 qiimaha guriga

HADDII CODEEYA YAASHU AQBALAAN AFTIDA

GOOBAHA DUGSIGA	QORSHAHA DHISMAHA
DHAMAAN Dugsiyada	Gelitaano amnigoodu sugan yahay, goobo ku haboon wax barashada, qalab casriya, la hormariyey tayada hawada
Dugsiga Hoose ee Carver	Balaadhinta tacliinta
Dugsiga Hoose ee Cowern	Gelitaano amnigoodu sugan yahay, goobo ku haboon wax barashada iyo qalab casriya
Dugsiga Hoose ee Eagle Point	Ka dhis dhisme cusub goobta hadda taasoo qaadaysa 800 oo arday, kadib ka saar dhismihii hore
Dugsiga Hoose ee Weaver	Gelitaano amnigoodu sugan yahay, goobo ku haboon wax barashada iyo qalab casriya
Dugsiga Dhexe ee John Glenn	Cusboonaysiin iyo balaandhin, ku darista barkada dabaasha cusub, hagaajinta socodka gaadiidka
Dugsiga Dhexe ee Maplewood	Xidhan; ka dhis dugsi hoose oo qaadaya 800 arday goobta loogu talo galay, kadib ka saar dhismihii hore
Dugsiga Dhexe ee Skyview	Cusboonaysiin, baarkinka ga-waadhida iyo hagaajinta socodka gaadiidka
Dugsiga Sare ee Tartan	Balaadhinta tacliinta
Dugsiga Sare ee North	Balaadhinta tacliinta
Beaver Lake, Gladstone, Harmony, Next Step	Gelitaano amnigoodu sugan yahay, goobo ku haboon wax barashada, iyo qalab casriya
Dugsiga Hoose ee Oakdale	Xidhan; ka saar dhismaha, ugu dar dhul dugsiga sare ee Tartan
Dugsiga Hoose ee Skyview	Xidhan; noqday dugsiga hoose ee Skyview kadib dib u habaynta
Dugsiga Hoose ee Webster y	Xidhan; dib u isticmaalid barnaamijyada degmada

Ogow: Dugsiyada hoose ee Castle iyo Richardson waxay helayaan cusboonaysiin ah 2018 -19 iyagoo isticmaalaya deeqaha hadda ee degmada. Dib u cusboonaysiinta waxaa lagu taxay xaga sare ee dhamaan dugsiyada degmada laakiin waxay u baahanyihiin cadaynta deeqaha cod bixiyayaasha.

XAQIIQOQYINKA MAALIYADEED

- Sababtoo ah waxaan bixinaynaa daymihii hore, waxaan haysanaa fursad aad dib ugu maal-geliinayno dugsiyada yada iyo qaabaynta degmada si ay ula timaado kharashka yare e lagu daray cashuur bixiyayaasha.
- Waxaanu gudoonay Abaalmarinta Maaliyadeed ee Minnesota Waaxda Waxbarashada Dugsiga ee gudbinta xogta maaliyadeed wakhtigeeda iyo saxsanaanta warbixinta maaliyada.
- Waxaan ka kaydinay cashuur bixiyayaasha inka badan \$7 milyan iyadoo dib u maalgelinta boonanka in ka badan saddexdii sano ee lasoo dhaafay.
- Waxaanu si joogta ah u helnaa baadhayaal ka socda kuwa madaxa banana, kaasoo ah warbixinta ugu wanaagsan ee ururku heli karo.
- Boonanka mise Cashuuraha? Boonaanku waa dhismayaa-sha halka Cashuurtuna tahay waxbarashada. Maalgelinta Boonanku kaliya waxay noqon kartaa inloo isticmaalo dhismaha iyo dib u cusboonaysiinta. Cashuuraha shaqa ynaya waa maalgelin sharci ahaan kala gooniya kuwaasoo codbixiya yaashu oggolaan karaan inay taageeraan fasalada iyo barnaamijyada waxbarasho. Aftida 2016ka taasoo codbixiya yaashayadu aggolaadeen waxay ahayd cashuurta shaqaynaysa. Codsiga 2019ka waa maalgelinta boonanka.

Dugsive Addeg = Bulsho Addeg

Cilmi-baadhis ayaa muujinaysa in tayada dugsiyada dowligaa ay tahay kkuwa ugu muhiimsan ee saamaynaya qiimaha guryaha. Dugsiyada ayaa saamayn toos ah ku leh xoogsaarista bulshada iyo qiimaha dib u iibinta guryaha.




HADDII CODBIXIYAYAASHU AANAY OGGOLAAN AFTIDA

- Dugsiyadayadu waxay sii wadi doonaan inay haystaan cabashooyin ku wajahan badbaadada, amniga iyo habsami u socodka gaadiidka.
- Ardayda iyo shaqaalaha waxay sii wadi doonaan inay ka shaqeeyaan shaqooyin aan haboonayn, wakhtigoo du dhacay iyo goob aan caafimaad ahaan ku wanaagsanayn waxbarashada.
- Waxaanu sii wadi doonaa inaan in badan ku bixino shaqaynta iyo kharashaadka gaadiidka marka la eego haddii aanu adkayno iyo dib u hagaajinta dugsiyada.
- Dugsiyada qaar ayaa noqon doonaa kuwo buuxa/saxmad ah.
- Waxaanu waayi doonaa fursad aanu dib ugu maalgelino dugsiyada degmada iyadoo leh ugu yaraan koror cashuur.
- Kharashaadka dhismaha waxaa loo saadaaliyey inay kordhayso, ka dhigista isbadalada mustaqbalka kumo aad u qaali ah.

Cashuuraha Hantida Guud ee Sanadlaha ee Dugsiga

Cashuuraha Degmada 622 waxayka yar tahay marka la barbardhigo gedmooyinka ugu badan ee dugsiga



Cashuuraha la bixin karo 2018 oo ah \$200,000 ee qiimaha guriga
Isha xogta: Bixi 18 Warbixinta Cashuurta Dugsiga, Waaxda Tacliinta ee Minnesota.

MACLUUMAADKA CODAYNTA

Codaynta waxaa la furi doonaa 7am ilaa 8pm ee maallinta Salaasada Maay 14keeda. Codaynta hore waxay bilaabmi doontaa Maarso 29keeda. Si aad u hesho goobtaada codaynta, booqo www.mnvotes.org.

WAXBADAN KA BARO:

- Booqo www.isd622.org/bond2019
- Iimayl communications@isd622.org
- Wac 651-748-7629



School District 622

NORTH ST. PAUL | MAPLEWOOD | OAKDALE

Ready for tomorrow

Diyaariyey oo bixiyey Dugsiga Degmada 622, 2520 East 12th Avenue, North St. Paul, MN 55109